# XADIISYADII LAGU HAYSTEY SH. TAKAR KUWAA MA AHA LAAKIIN WAA KUWII MUSAYLAMAH:

**بسم الله الرحمن الرحيم الحمد لله وحده** و **الصلاة** و **السلام على** من **لا نبي بعده** و **على آله** و أصحابه أجمعين

Waxa aan akhristayaasha ka daboolayn, Muxaadarooyinkii iyo qoraaladii lagu nashriyey bogaga internetka kuwaas oo ka dhexeeyay culimada iyo dad kale oo arintaa wax ka qoray :

Sh Maxamed Cabdi Umal, Sh Maxamuud Sh Maxamed Shible iyo Sh Xasan Maxamuud Takar.

Anigoo filaya inaad ka dharagsan tihiin, hadana nuxurku wuxuu ahaa Sh Xasan Maxamuud Takar oo muxaadaro uu jeediyey ku soo qaatay Axaadiis 5 ah oo uu nabigeena suuban (scw) u tiiriyey, kuwaas oo culimada kale ku adkaatay inay xaqiijiyaan jiritaankooda.

Sh Maxamuud Sh Maxamed Shible ayaa xusay inuu si khaas ah xiriir ula sameeyey in axaadiistan uu meel u saaro Sh Xasan Maxamuud Takar, kadib markii kutub sheikh Takar sheegay inuu ka soo xigtey inaba laga waayey. Sh Maxamuud Sh Maxamed Shible ayaa si xeeldheer uga codsaday in axaadiistaas rasuulka loo tiiriyey (scw) sheikh Takar meel cad saaro si diinta loo hufo.

Sh Shible ayaa ku dheeraaday meel u helida axaadiistaas iyadoo aan wax muhiimad ah la siinayn darajada ay leeyihhn sida, daciif, saxiix iwm. Wuxuu kaloo xusay in uu xataa aqbali karo hadii laga helo kutubta lagu takooray ama sida khaaska ah loogu aruuriyey axaadiista been abuurka ah.

Sidoo kale Sh Sh. M shible wuxuu cadeeyey in rasuulka (scw) oo lagu been abuurtaa ay tahay danbi culus, wuxuuna ka codsaday xarakada Al shabaab hadal macnahiisu yahay inay soo dhex galaan oo ka joojiyaan Sh Takar arin diineed in aan wax laga waydiin karin, markhaati iyo meel xaqiiq looga baahan yahayna in uusan wax ka oran karin, maadaama rasuulka (scw) qofkii ku been abuurta aanu wax kale ka gabanayn.

Inta aan ogahay Sh Xasan Takar ilaa hada lagama hayo inuu axaadiistaas meel ku sheegay ama la yimid cudaar ah inuu isagu ku talo xumaystay samayntooda.

### Codsiga Sh Maxamuud Shible mugdi miyaa ku jira mise mugdi ayaa la inaga galinayaa:

Waxaan aad ula yaabay labo qoraal oo ka soo muuqday bogga Internetka ee somalimemo iyo kuwo kale, Waxa qoraaladan loogu magac daray :
**“Axaadiistii lagu haystey Sh Xassan Maxamuud Takar tolow ma kuwanaa 18/12/11” Qore: Maxamed Xirsi Guuleed , iyo “ Baxthi Cilmiyaysan…19/12/11 Qore Axmed Cartan” qoraaladani** guud ahaan waxay ahaayeen kuwo isku mid ah, marka laga eego jawaabaha ay ka bixiyeen xaqiijinta axaadithta laga shakisan yahay in la sameeyey, laakiin waxay ku kala duwanaayeen asluubta loo soo bandhigay, qoraalka hore oo uu leeyahay M. Xirsi Guuleed wuxuu u soo gudbiyey qaab ixtiraam leh, xirfadaysan, oo ay ka muuqato asluubta xiwaarka. Qoraaga kale waxa qoraalkiisu u badnaa cay iyo aflagaado ku aadan culumadii mowduuca uga horeysey, mana sheegin wax loo qaadan karo jawaabtii la sugayey, aflagaadaduna ma mudna in lala wadaago.

### Nuxurka Qoraalka (Tolow Axaadiithtii Laraadinayey ma kuwan baa)

**Qoraagu wuxuu dadaal iyo juhdi badan ku bixiyey saddex arimood:**

**Arinta koowaad**: In loo muujiyo mowduucu inuu yahay, “culimo iska maandhaaftay dhexdooda, oo isku haysta diin, siyaasad,kooxaysi ama shaqsi”

**Arinta Labaad** : Inuu mugdi galiyo waxa laga codsaday sheek Xasan Takar iyo axaadiista laga rabo waxa ay yihiin, si loogu qaato in la waydiiyey waxaan qeexnayn oo jawaabo badan ixtimaali kara (lagu FASIRI karo) ama siyaalo kala duwan looga jawaabi karo, markaasna shacabka iyo akhristayaashu ku wareeri karaan, . Xaq iyo baadilna kala garan waayaan, oo markaana lagu dhexdhexaadiyo war culimada is haysa kala qabta.

**Arinta Saddexaad**: In loo tuso shacabka in sheikh Takar axaadiista lagu haysto AY JIRAAN laakiin dhacdooyin khaldan lagu macneeyey oo kaliya, isagoo sheegay xataa inuu qoraagu hayo halka ay ku qoran yihiin 5 taa xadiith. Waxa xasuusin mudan in labadan qoraal la sameeyey labo maalmood oo isku xiga laguna beegay xili aad loo sugayey in Sh xasan Takar jawaab ama cududaar laga helo, si buuq loogu furo mowduuca oo dhan, **لا تسمعوا لهذا القرآن والغوا فيه لعلكم تغلبون ,** haddii kale waxay sugi lahaayeen in Sh. Takar axaadiistan meel saaro maadaama uu joogo welina fatwoonayo, ninka wax lagu haystayna uu isaga ahaa garanayana sababtuu usoo daliilsaday iyo meesha uu ka keenay.

## Hadaba waa maxay codsiga dhabta ah ee Sh. Shible ka codsaday Sh Takar.

Xaqiiqdu waxay tahay in Sh Takar lalgu haysto gabi ahaanba jiritaanka axaadiista 5 ta ah, hadii Sheekhu leeyahay waa jiraana inuu keeno kutubta uu ka soo guuriyey safxada iyo raqamka(LAMBARKA) axaadiista oo lafdigoodu sidaa uu u qoran yahay. Qoraagu wuxuu xusay qayb kamida codsiga Sh Shible laba codsi oo midba mar yahay ayuu soo gudbiyey, laakiin codsisga oo dhamays tiran ayaa sidan u qoran:

***Codsigii Koowaad: Sh Shible:***

***“Haddii Sh. Xassan Maxamuud Takar uu hayo jawaab dadka shaafisa oo axaadiithtaas uu kaga jawaabay, waxaan dhihi lahaa haddaba hasoo gudbiyo.***

***Waxaan aniga iyo dadkuba sugaynaa meesha ay ku yaalaan axaadiithtan soo socota oo kamid ah kuwii badnaa ee lagu haystay Sh. Xasan Maxamuud Takar:***

***(1) Haddii ciraaq la cunaqabateyo, caruurtoodana la gaajaysiiyo waxaa soo baxaya mahdigii ?***

***(2) Waxaa laydinku dili doonaa magaca ” Irhaab “?***

***(3) Mahdiga runta ah iyo kan beenta ah waxaa u dhaxeeya 20 sano ?***

***(4) Markii mahdigu soo baxo waxaa ugu farxad badnaan doona reer Ciraaq dhibaatada ay ku jiraan darteed?***

***(5) Dajaal waxuu kusoo dagayaa Juruf guriga boqorka?***

***Waxaan ka codsanayaa Sh. Xasan Maxamuud Takar in uu meel ku sheego axaadiithtaas ku jirta muxaadaradiisa aan ka hadlayno." (waxa qoray Sh shible)***

***Codsigii Labaad: Sh Shible: Codsi Mar kale:***

***Waxaan Sh. Xassan Maxamuud Takar ka codsanayaa mar labaad in sidii culimada lagu yaqiinay meel ugu sheego axaadiith-ta oo kala ah: (wuxuu sh. Shible xusay isla shantii xadiis ee aan kor ku soo aragnay)***

***Axaadiith-ta daciifka ah: Sh. Shible***

***Waxaan ka dhagaystay Sh. Xassan maxamuud Takar in axaadiith-ta daciifka ah loo daliishan karo baabka tarqiib iyo tarhiib, fadaa’il Al- acmaal, waxaan ku tacliiqin lahaa 5-tan qodob:***

***1-Waa sidaas uu sheegay Sh. Xassan Maxamuud Takar in ay qabaan culima badan, laakiin ma ahan Axaadiith-tan aan ka hadlayno daciif ee waa Mawduuc ( Been abuur).***

***2- Waxaan rajaynayaa in Sh. Xassan Maxamuud Takar igu waafaqayo in Axaadiith-ta mawduuca (Been abuurka ) ah aan meelnaba loo daliishan karin oo aan culimada xadiith-ku isku khilaafin.***

***3-Waxaa kale oo aan rajaynayaa in uu igu waafaqayo in axaadiith-ta mawduuca ( been abuurka ) ah waajib diini ah tahay in la cadeeyo oo umadda laga qabto.***

***4-Waxaa kale oo aan ka rajaynayaa in Sh. Xassan Maxamuud Takar igu waafaqayo in samaynta axaadiith Mawduuc (Been abuur) ah kamid tahay xaaraanta ugu waawayn danbiyada la galo, culimada qaarkoodna qabaan in lagu gaaloobayo.***

***5-Axaadiith-tani ma ahan Daciif ee Waa mawduuc ( Been abuur ) kumana taalo meel kamid ah kitaabta intaan ogahay, oo sheegaa ma dhaaftee meel haku sheego.***

***Sidaas darteed:***
***Waxaan Sh. Xassan Maxamuud Takar uga codsanayaa si xeel dheer oo celcelis leh:***

***In axaadiith-taas sheego kitaabka ay ku qoran tahay iyo meesha ay kaga qoran tahay ?***

***Waxaan ka aqbali lahaa ugana mahad celin lahaa haddii uu ku sheego tan iyo kutubta lagu aruuriyay axaadiith-ta been abuurka ( Mawduuca ) ah !!.***

***Haddiise Sh. Xassan Maxamuud Takar meelnaba ku sheegi karin axaadiith-taas uu asagu sheegay in Nabigu SCW yidhi, waxaan ka codsanayaa in uu ka bixiyo Cudurdaar si baabkaas loo xidho.***

***Xasuusin:***
***-Waxaan xasuusinayaa Sh. Xassan Maxamuud Takar in maanta tahay aduun barina tahay aakhiro, qof walibana qaldami karo, laakiin ay tahay a uu galo, gaar ahaan midkan oo kale.***

***- Waxaa kale oo aan xasuusinayaa dhamaan aqristayaasha in haddii Sh. Xassan Maxamuud Takar meel ku sheegi waayo axaadiith-taas in loo qaadanayo in asagu sameeyay oo ay tahay been abuur (Mawduuc ) uu diiday in uu ka cudurdaarto.***

***- Waxaan xasuusinayaa dhammaan aqristayaasha qoralkayga in qofkii ay ku cadaato in uu sameeyay axaadiith been abuur ah ( Mawduuc ) aanay banaanayn in diin iyo aduun toona wax laga rumaysto, inta uu nool yahayna aanu gali karin marqaati wax yar iyo wax wayn toona.***

***Codsiga Sh Shible ee ku aadan Al- Shabaab:***

***- Waxaan xasuusinayaa dhamaan inta qoraalkaygani gaadho in ay waajib ku tahay Xarakada Al-shabaab in ay ka mamnuucaan qof kasta oo ay ku cadaato in uu ku been abuurtay Nabiga Scw in uu ka hadlo diin, danbina tahay in loo ogolaado ka hadalka diinta qof Nabiga Scw waxuu doono ka sheegaya ama ku been abuuranaya.***

***Hadaba si aanay taasi u dhicin waxaan Sh. Xassan Maxamuud Takar ka codsanayaa in uu is bari yeelo oo axaadiith-taas si toos ah meel ugu sheego. Waxaa Qorey /Sh. Maxamuud Maxamed Shible***

## Codsiga Sh Shible Maxaan ka fahaney:

Hadaba waxa u cad shacabka, akhristayaasha iyo cidkasta oo af soomaaliga ku hadasha in waxa Sheekh Takar laga rabo ay yihiin oo kaliya Axaadiista shanta ah uu sheegay in nabiga (scw) laga wariyey xaqiiqdooda iyo meesha laga keenay uu soo gudbiyo. Haddii si kale loo yiraahdo Sh. Takar lama waydiin:

1-Axaadiis saxiix ama Daciif ah oo ka duwan shanta xadiis ee kor lagu soo sheegay, Laakiin la aqbali karo xataa haday yihiin kuwo mowduuc ah (BEEN ABUUR) mar haddii la sheegi karo kutubka ay ku jiraan taas ayaa shardi ah, sidaasna mowduuca oo dhan waa lagu xiri karaa shiddo la'aan.
2-In aan loo baahnayn Axaadiis leh faham u dhow ama u eg kuwa la soo sheegay darajada ay doonaan ha yeesheene.

3-In aan Sheekha la waydiin tafsiir ama xadiis loo isticmaalay si khaldan dhacdo taagan ama mid soo socota.

## Sida qoraagu Mowduuca u dhigay!

"Waxan dhawaan isha ku hayey buuq iyo ismaan-dhaaf ka oogmay wadaado Soomaaliyeed dhexdooda. Ismaandhaafkaas oo yeelan karayey midabbo diineed, qaar siyaasadeed, qaar kooxeed ama qaar shakhsiyeed, Maxay haddaba labada sheekh ee Shible iyo Umal, ku haystaan Sheekh Xasan Takar?

1- Ma jiritaanka xadiisyadan baa? oo waxay u baahanyihiin uun in kitaabadii laga soo xigtay loo sheego? (waa sida ka muuqata hadalkooda eh).

2- Mise darajada xadiisyada ayey rabaan, sida (Saxeex iyo Daciif ama mawduuc).

3- Mise waxay diidanyihiin sida uu sheekhu xadiisyada ugu fasiray dhacdooyin wakhtigeennan dhacay oo macruuf ah oo mucaasir ah?"

**Jawaabta Qoraaga (fadlan ka akhri somalimemo.net iyada oo dhan)**

**Xadiith** 1: Haddii ciraaq la cunaqabateeyo, caruurtoodana la gaajaysiiyo waxaa soo baxaya mahdigii

Jawaab 1: **Waxa jira xadiis saxeex ah oo meelo badan ku jira…….etc**

**Xadiith** 2: Waxaa laydinku dili doonaa magaca " Irhaab "?

Jawaab 2: **Jawaab aan ku kalsoonaado ma helin,……etc**

**Xadiith** 3: Mahdiga runta ah iyo kan beenta ah waxaa u dhaxeeya 20 sano

Jawaab 3: **Waxa jira aathaar aanan xaqiijin karin darajadooda iyo sugnaantooda…**

**Xadiith** 4: Markii mahdigu soo baxo waxaa ugu farxad badnaan doona reer Ciraaq dhibaatada ay ku jiraan darteed?

Jawaab4: **Waxa jira athar ama xadiiis mawquuf ah oo laga soo wariyey Cabdillaahi Bin Camar Bin caas. Ma ogi darajada saxeexnimadiisa**

Xadiith 5: Dajaal waxuu kusoo dagayaa Juruf guriga boqorka?

Jawaab 5: **Waxa jira xadiisyo saxiix ah oo kutubo badan ku soo arooray**

## Xagee Salaadu iska qaban La'dahay:

Waxaan muuqata in Sheekh Takar waxa laga doonayo uu ahaa Axaadiista shanta ah oo kaliya, xataa haday yihiin mowduuc ama been-abuur (Mowduuc) hore u jiray si meesha looga saaro in hadda la sameeyey. hadii lawaayo, oo Sheekha ay qiiro diineed qaaday waxa laga codsaday (sida ay Sh Shible ka wada hadleen) inuu ka cududaarto **الاعتراف بالخطأ فضيلة** waxa kale oo isweydiin mudan in Sh. Takar fasiraad dheeraad ah codsan lahaa hadii mugdi kaga jiro waxa la weydiiyey, mudo dheer ayaana ka soo wareegtey.

Arintani waxay leedahay muhiimad weyn hadii Sheekhu khaladkiisa qirto isaga ayaa ah qofka koowaad oo ka faa'iidaya towbada inta aan la gaarin umada Islaamka ah oo diin u qaadanaysa Axaadiis la sameeyey. In axaadiis la sameeyo oo diinta lagu daro waa danbi Ilaahay agtiisa ku weyn

oo keeni kara (fasaadul cibaad wal bilaad,) cid ka dulmi badanina ma jirto qofkii alle iyo rasuulkiisa ku been abuurta, hadiise taasi dhacdo in qofkaa dulmiga loogu hiiliyo ma banaana sida rabi casa wa jalla sheegay:

**ولا تركنوا إلى الذين ظلموا فتمسكم النار**

**ومن أظلم ممن افترى على الله كذبا أو قال أوحي إلي ولم يوح إليه شيء ومن قال سأنزل مثل ما أنزل الله )**

**(إن كذباً علي ليس ككذب على أحد، من كذب علي متعمداً فليتبوأ مقعده من النار) .**

Rasuulka (saw) waxa laga wariyey inuu yiri: "in la'igu been abuurtaa lama mid ah, cid kasta oo kale oo lagu buun abuurto, qofkii igu been abuurtana ha diyaarsado booskiisii uu naarta ka degi lahaa"

**Waa maxay Shidada haysata Qoraaga.**

Waxa la dareemi karaa in qaraagu geed kasta u fuulay inuu difaaco Sheekh Takar wax kasta oo ay ku qaadataba, waxa laga yaabaa in dad badani u cududaari lahaayeen qoraaga hadii codsigu yahay in Sheekha (**Aduunka la dhaafiyo.) oo uu is yirahdo walaalkaa naftiisa badbaadi.**

Waxaan kale oo ognahay in Shabaabku yiraahdaan waxaan difaacaynaa diinta Ilaahay, ujeedada aan leenahayna waa in kitaabka dhulka lagu xukumo. Waxay ka hadleen markii Joornaal ka soo baxa Denmark uu caayey rasuulkeena (SAW) marka waxa isweydiin leh, Sh Xasan Takar haduu noqdo nin ay ku cadaato inuu Nabiga (SAW) ku been-abuurtay, isla markaana diido wax cududaar

iyo ictiraaf ah , Shabaanku xukun ma ku fulinayaan, mise arintu waa tii yahuuda lagu canbaareeyey oo xukunku wuxuu ku dhacaa masaakiinta tabarta daran danbigoodu haba yaraadee. !

Waxa kale oo la ogyahay inuu fatwo ku bixiyey in culimada ka aragti duwan la laayo oo taasi xaq tahay, aragtidiisana dabcan ku dhisay fahamka iyo axaadiista noocaan oo kale ah. Waxaan kale oo la soconaa in Sh/Dr Axmed xaaji Abdiraxman (allaah ha u naxariistee) la diley maalin kadib fatwadii Sh.Xasan.

Waxaan shaki ku jirin in uusan af mooyee gacan ka gaysan dilkii Sheekha laakiin, arintaani soow ma aha mid iska cad oo Caamo iyo Culimaba ay fahmi karan oo aan baahnayn in kutub laga fiiriyo ama Culimo lasoo waydiiyo bal inay noqonayso ka qayb qaadasho uu Shekh Xasan ka qayb qaatay dilkii allaha u naxariis Dr Axmed iyo in kale.

Waxan kale oo ognahay in qofkii hal kalimad ku kaalmeeya dilka qof mu'min ah uu la midyahay kii gacanta lahaa, bal ka waran qofkii si cad oo aan gabasho lahayn FATWO aan jirin ku ku amra in dhiiggooda la daadiyo walibana laga horaysiiyo gaalada la sheegay in lala jihaadayo oo diinta iyo dalkaba laga horjoogo. Rasuulku wuxuu yiri (scw)

**مَنْ أَعَانَ عَلَى قَتْلِ مُؤْمِنٍ بِشَطْرِ كَلِمَةٍ لَقِيَ اللَّهَ عَزَّ وَجَلَّ مَكْتُوبٌ بَيْنَ عَيْنَيْهِ آيِسٌ مِنْ رَحْمَةِ اللَّهِ "**

“ qofkii kaalmo ka geysta dilka qof mu’min ah xataa kalimad qaarkeed, Rabbi wuxuu la kulmaa isagoo ay labadiisa indhood dhexdooda ku qoran tahay, kii ka quustay naxariista Alle”

Taa waxa la mid ahayd Sh. Xassaan Xussein oo sheegay inuu horayba u sheegay hadana ay tahay in la laayo culimada aragtida aan ku waafaqsanayn. Isagoo hadalkiisa sii wata ayuu yiri kii dilaa waa mujaahid kan la dilaana(CULIMADA) waa shahiid.

Fatwada  macnaheedu waxay tahay qof ayaad dilaysaa adigoo qaba inuu muslim yahay kuna qanacsan weliba haduu gacantaada ku dhinto in uu Shahiid noqonayo . Marmar baan waxaan is weydiiyaa diinta laga hadlayaa tii Islaamka miyaysan ahayn.

Waxaad garanaysaan xadiithkii muslim iyo bukhaariguba weriyeen ee miqdaad bin Aswad ee ahaa: “ Rashuulkii  Ilaahayow ka waran hadaan nin gaal ah dagaal isaga hornimaadno markaana uu gacanta seef iiga gooyo, uu markaa geed ku gabado oo yiraahdo waan muslimay, ma dilayaa? Rashuulku wuxuu ku jawaabey ha dilin. Markaa ayuu sii waydiiyey, rasuulkii ilaahayow gacan tayda ayuu gooyey intuusan ashahaadan, rasuulku (scw) wuxuu yiri: ha dilin, hadaad disho booskaagii ayuu tagayaa (muslinimada) intaadan dilin adna booskiisii ayaad tagi intuusan ku dhawaaqin kalimada ashahaadada.”(gaalnimo)”

حديث المقداد بن الأسود - رضي الله عنه - قال : ( يا رسول الله أرأيت إن لقيت رجلا من الكفار فقاتلني فضرب إحدى يدي بالسيف فقطعها ثم لاذ مني بشجرة فقال : أسلمت لله . أفأقتله يا رسول الله بعد أن قالها ؟ قال رسول الله - صلى الله عليه وسلم - : لا تقتله إلى أن قال : فإن قتلته فإنه بمنزلتك قبل أن تقتله وإنك بمنزلته قبل أن يقول كلمته التي قال )

Toloow muxuu ku jawaabi lahaa Nebigu(csw) haddii la waydiiyo, Nebi alloow ka waran haddaan dilo nin kamida culimada diinta noogu badisa oo intaa dacwada ilaahay ka soo shaqaynayey oo hadda xajkii soo gutay, salaad subaxna soo tukaday oo dimadii ilaahay ku jira, soomanna maalinta sagaalaad ee bisha muxaram, wax danbi ah oo kamida kuwii dhiigga qofka muslimka ah lagu banneeyayna aan galin?**.**Mindhaa jawabtaas kuwo garaya waa la helayaa.!

## Been Abuur kale:

Waxaa isweydiin leh xad intee le’eg ayay diyaar u yihiin qoraayaashu inay difaacaan Sheekh Takar iyadoo la og yahay in sidoo kale Sheekh Umal ka sugayo wax uu ugu yeeray been-abuur dhowr arimood oo ay ka mid ahaayeen Sheekh Takar oo sheegay:

1-In Sheekh Umal uu ka qayb galay shir Nairobi ka dhacay halkaana ka sheegay hadal uu ka mid yahay,: in Lala dagaalamo shabaabka waa Xaq, in Somalia gaaladu gashana waa xaq etc.

2-In Ibraahim dheere loo magacaabay safiir.

3-In Zanawiga Etheopia uu abaabuley shirkii culimadu ku qabatay Jigjiga kharashkana bixiyey.

4-In Sheekh Bashir Salaad uu taangiga gaalada ku gabanayo halkaana gantaalka kaga soo ridaya shacabka xamar degan iyo kuwo Kale. Waxaan ognahay in Sheekh Bashiir Salaad ku sugnaa magaalada Burco waqtigaa.

## Camar Ibn Caas & Musaylamah Alkadaabab

Qoraagu wuxuu I xasuusiyey,mar uu soo xigtey (Athar & ama xadiith waa sida uu yiri) **Cabdullahi bin Camar bin Caas** in aabihii **Camar bin Caas** oo (aad ku xasuusatid intii uusan muslimin, inuu ka mid ahaa ragii loo diray inay soo qabtaan saxaabadii u hijrootey Boqorkii xabashida Najashi raximahullaah) ayaa hadana booqday intii uusan diinta soo gelin Musaylamah Alkadaab(waa kii nabinimada sheegtay) oo jaahiliyadii ay saaxiibo ahaayeen. Musaylamah ayaa yiri Ayaamahaan maxaa lagu soo dajiyey Nabi Muxamed (scw) wuxuu ku yiri: Waxa lagu soo dajiyey suurad gaaban oo aad u xeeldheer, wuxuuna u akhriyey Suurat Al Casr. Cabaar ayuu fakarey oo yiri: runtii anigaba

iyadoo kale ayaa laygu soo dajiyey, markaa ayaa Camar bin Caas yiri , maxay tahay waxa lagugu soo dajiyey, wuxuu markaa akhriyey wax uu quraan u ekaysiiyey

**" يا وبر يا وبر إنما أنت أذنان وصدر وسائرك حفر نقرنق "**

Musaylamah ayaa yiri: sidee u aragtaa arintan? Camar Ibn Caas ayaa ugu jawaabey:

***" والله إنك لتعلم أني أعلم أنك لتكذب"***

**"**Walaahi waad ogtahay inaan ogahay in aad been sheegaysid"

Waxaa yaab leh hadii Camar Ibn Caas oo markaa Mushrik ahaa uu gartay xalku inuu ku jiro qofkii khaldan in loo cadeeyo maxay shido u noqotay Sheekha in khaladkiisaa loo tilmaamo.

**(قال ياويلتا أعجزت أن أكون مثل هذا الغراب فأواري سوأة أخي ) .**

waxa muuqata in miisanku lumay oo aan la fahmayn cida mudan in garab la siiyo, laakiin waxaynu aaminisanahay in diintan, rasuulka (scw) iyo islaamkaba Ilaah ayaa u gargaaraya,
**(وان تظاهرا عليه فان اللّه هو مولاه وجبريل وصالح المؤمنين والملائكة بعد ذلك ظهير).**
Diintaan ilaahay baa balan qaaday inuu xifdiyo wuuna dhamaystiray oo hadda waxba ugama baahna in lagu kabkabo axaadiis aan sugnayn amaba hadda loo alifo kuwo cusub, waxaa inaga badan oo inagu filan Kitaabka Ilaahay iyo Sunnada Nebiga (CSW).

Haddii si kale loo eego waxa la arkaa arintan in khayr umada ugu jiro oo ugu yaraan xaq iyo baadil kala caddaanayaan si kastoo baadilka loo qurxiyana sal uu ku istaago malaha , gaar ahaan marka xaqu soo daahiro.

**(وقل جاء الحق وزهق الباطل إن الباطل كان زهوقا)**
**( فَأَمَّا الزَّبَدُ فَيَذْهَبُ جُفَاء وَأَمَّا مَا يَنْفَعُ النَّاسَ فَيَمْكُثُ فِي الْأَرْضِ )**
Waxayaalo ka daran ayaa la soo maray, qisadii ifkiga ee qoyska Rasuulka (scw ) lagu been abuurtay iyaduba waa jirtey (Suuratu Nuur) hadana Allaah wuxuu sheegay inay umadu shar u malaynayso laakiin ay khayr u tahay

**(إِنَّ الَّذِينَ جَاءُوا بِالْإِفْكِ عُصْبَةٌ مِنْكُمْ لَا تَحْسَبُوهُ شَرًّا لَكُمْ بَلْ هُوَ خَيْرٌ لَكُمْ)**

## Diinteenu Waasic sow Ma aha?

Diinteena ma aha ciriiri u baahan qofkii khalad gala in uusan towbad keen lahayn oo u baahan yahay dadka jeceli inay meel gees ah la galaan oo halkaa ku difaacaan, kaliya wuxuu u baahan yahay inuu towbad daacad ah la yimaado, intaa wixii ka danbeeyana dunuubta Rabbi ayaa dhaafa. Qisadii aan hada soo xusnay waxa jirtey nin saxaabi ah (Misdaax bin Athaatah), oo fitnada dhex qaaday ayaa Abuu bakar qaraabadiisa ka mid ahaa uuna dhaqaalayn jirey, markii aayado qur'aan ahi soo dageen oo arintii kala cadaatay, Abuu Bakar wuxuu damcay in uu ciqaabo oo dhaqaalaha ka goosto, markaas ayaa qur'aan kale soo dagey lagu tirtirsiinayo dadka Alle uu dhaqaale siiyey inaanay u diidin quudinta qaraabada, masaakiin iyo kuwa Alle dartii u soo hijroodey, iyadoo la ogyahay dhibaatada ay u geysteen qoyska Nabiga (scw):

**( ولا يأتل أولو الفضل منكم والسعة أن يؤتوا أولي القربى والمساكين والمهاجرين في سبيل الله وليعفوا وليصفحوا ألا تحبون أن يغفر الله لكم والله غفور رحيم )**

Markaa waxa quman ciddii khaldan in lagu saacido siday towbad nasuuxah(wanaagsan) ula imaan lahaayeen laakiin uma baahna athaar iyo axaadiith mowduuca ka baxsan in la isku shideeyo. Teeda kale maxaynu ku haysaney suufiyadii sheekhooda dacalka haysatey?

## Gunaanad iyo Naseexo :

**Sheekh Takar** Waxay u egtahay inuusan wax axaadiith ah meel ku sheegi karin, waxa u fiican inuusan aakhiradiisa seegin khaladkiisana ictiraafo. Cisada iyo sharaf jacaylkuna waxay dadka ku xanbaaran inay xaqa diidaan.

**(وإذا قيل له اتق الله أخذته العزة بالإثم فحسبه جهنم ولبئس المهاد).**

Inkastoo arimaha hadda sheekh Xasan horyaalla aysan ahayn oo kaliya axaadiistan buuqa kicisay ee ay ku soo biirtay sidii aynu kor kusoo xusnay fatwadii uu Sheekhu ku banneeyay dilka culimada oo qaarna ay sidaa ku tageen oo lagu dilay, kuwo kalena ay sugayaan,maadaama aysan jirin meel looga joojiyay kuwii la yiri Culimada laaya.

Waxaa is waydiin leh. Sheekha fatwadas maka noqon doonaa? Sheekha axaadiistaas ma cadayn doonaa inaysan jirin? Sheekhu akhbaarihii kale ee sugnaantooda la waayay sida kuwii uu ka sheegay Sheekh umal maka cudurdaaran doonaa? Sheekhu kowo hor leh ma iska ilaalin doonaa, oo lagu hagardaamaynayo ama lagu dilayo dad ilaahay dhiiggooda iyo cirdigodaba xaaraantinimeeyay?

Nebi (CSW) wuxuu yiri: - عن ابن عمر رضي الله عنهما قال: رأيت النبي ـ صلى الله عليه وسلم ـ يطوف بالكعبة وهو يقول: " ما أطيبك وأطيب ريحك، وما أعظمك وأعظم حرمتك والذي نفس محمد بيده لحرمة المؤمن أعظم عند الله تعالى حرمة منك، ماله ودمه وأن يظن به إلا خيرًا، رواه ابن ماجة.

Sida xadiiskan ku cad kacbada oo la og yahay sharafteeda iyo xurmadeeda hadana qofka muslimka ah xurmadiisa ayaa ka weyn.

Waxaa laga yaabaa dad badan oo dhiig muslim si sahlan u daadinaya inay ku adkaan lahayd inay KACBADA dumiyaan ama xumaato ku sameeyaan, laakiin waxaysan ogayn in qof muslim ah oo la dilaa ay ka daran tahay, Ama waa ogyiihiin qaarkoode laakiin ujeedooyin kale ayay ka leeyihiin.

**Dhalinyarada** waxa la gudboon inayan Sheekha iyo towbada kala dhex istaagin si uusan ugu qaadan inuu ku saxnaa ama uusan ku adkaysan danbiga isagoo sumcad iyo taageero ilaashanaya taasoo lagu yaqaan dabeecadaha insaanka.

**Qoraaga maqaalka** aan ka hadalay waxan si gaara u xusuunin lahaa, difaacidda uu isku dayey inuu sheekha difaaco waxay sii caddaysay inaan axaadiistaas meel lagu sheegi Karin, oo ay tahay ninkii sheegay ma dhaafto, Sheikh Takarna aan laga filayn jawaab laakiin laga filayo cududaar towfiiqda Alle ha waafafiyee. Dad badani waxay u qaadan karaan waxa difaac noqon lahayd mar

hadaadan Sheekha xaqa u sheegayn inaad aamus ugu kaalmaysid maadaama aadan xal u keenin axaadiith tii laga sugayey. Xaqa iyo khayrka ayaana ah kan loo baahan yahay in la isku kaalmaysto

**( وَتَعَاوَنُواْ عَلَى الْبرِّ التَّقْوَىوَ وَلاَ تَعَاوَنُواْ عَلَى الإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ)**

Maanta hadaad u doodaan maalinta aakhiro qofkee u doodi kara, waxa ila quman hada in wax la taro.

**{(ها أنتم هؤلاء جادلتم عنهم في الحياة الدنيا فمن يجادل الله عنهم يوم القيامة أم من يكون عليهم وكيلا)**

**Shabaabka** ma garanayo waxa ay ka yeelayaan arintan, laakiin Shacabka iyo akhristayaashu waxay la socdaan in shabaabku leeyihiin labo kafadood (miiisaan) mid ay ku miistaan iyagu iyo tan kale oo umadda ka aragti duwan ay ugu miisaan.

Tallow Sheekh Takar tee loogu miisi doonaa?

**Qore/ Abdirashid Maxamuud. Email: abu.ismail40@gmail.com**